

Ku difaac ilmahaaga talaalada

Talaallada bilaashka ah ee cunugaaga ayaa ka difaacaaya cudurada caabuqa, maalin kasta.

Waa maxay sababta aan cunugayga u talaalaayo?

Talaallada carruurnimada hore ayaa la siinaayay carruurta Ireland iyo aduunyada oo dhan sano badan. Cilmi baaris ayaa noo sheegaysa inay leeyihiin badqab, ayna waxtar leeyihiin.

Talaallada ayaa ah qaabka ugu wanaagsan uguna amaanka badan ee ilmaha looga difaaco caabuqyada xunxun.



Ma muhiim baa wakhtiga la bixinaayo?

Qaabka ugu wanaagsan ee ilmaha looga difaaco cuduradaan waa in la xaqiijiyo in ay qaataan talaaladooda wakhtiga loogu talo galay.


Waxaa ugu fiican inaad ilaaliso jadwalka, maadaama mar kasta oo aad talaalka dib u dhigto, ay khatar gelinayso ilmahaaga.



Talaalladu ma ka difaacayaan ilmahaaga cudurada?

Talaallada ayaa ilmahaaga ka difaacaaya 14 cadurada caabuqa ah. Cuduradaan ayaan dhammaan.

Ilmaha dhashay iyo carruurta yaryar ayaa khatar dheeri ah ugu jira inay aad ugu xanuunsadaan caabuqyada sabab la xiriirta in nidaamyadooda difaacu aysan wali si buuxda u abuurmin.



Waa meeqa qiimaha talaalladu?

Wadanka Ireland, talaallada carruurta lacag la'aan ayay uga helayaan dhammaan carruurta dhakhtarkooda Guud (GP).

Marka aad talaasho cunugaaga wakhtigii saxda ahaa, waxaad siinaysaa sidaaca ugu wanaagsan wakhtiga uu ugu baahi badan yahay.



Maxaa dhacaaya haddii aan ka maqnaado booqasho?

Haddii cunugaagu ka maqnaado wax talaallo ah, wali wuu ka dabo tagi karaa. La hadal GP gaaga ama kalkaalisada GP-gaaga. Waxay kuu diyaarin doonaan ka dabo gaynta ilmahaaga talaallada uu u baahan yahay.

Haddii cunugaagu uga yimid Ireland wadan kale wuxuu qaadan doonaa talaallada lagu talinaayo in lagu qaato Ireland.



Xasuusnoow shan booqasho oo aad ku tagayso GP

Si aad u hesho xog dheeri ah booqo www.immunisation.ie




Talaallada Cunugaaga

Ilmaha dhashay markay ahayd ama kadib 1da Oktoobar, 2024

Talaaladee la siin doonaa cunugayga?

Booqashada 1 – 2 bilood

6 in 1+PCV+MenB+Rotavirus
3 Cirbadoo +Goojada afka
laga Siinaayo



Booqashada 2 – 4 bilood

6 in 1+MenB+Rotavirus
2 Cirbadoo +Goojada
afka laga Siinaayo



Booqashada 3 – 6 bilood

6 talaal oo ka
kooban 1+PCV
2 Cirbadoo

Lama siinaayo talaalka Rotavirus
marka la gaarooma kadib
8 bilood 0 maalmood jir



Booqashada 4 – 12 bilood

MMR+MenB+Busbuska
3 Cirbadoo



Booqashada 5 – 13 bilood

6 talaal oo ka
kooban 1+MenC+PCV
3 Cirbadoo



Haddii aad u gurto Ireland

Haddii cunugaagu uga yimid Ireland wadan kale, wuxuu qaadan doonaa talaallada lagu talinaayo in lagu qaato Ireland. Tan ayaa ka difaacaysa cudurada ku badan wadanka Ireland. Dhakhtarka Guud (GP) ama Kalkaalisada Caafimaadka Guud ayaa kuu sheegi doona talaallada cunugaagu u baahan karo.

Erayada la soo gaabshay iyo micnahooda

6 kamid ah 1 Gawracatada, Caabuqa Hargabka (Haemophilus influenzae b (Hib), Cagaarshoowga B, Jixdheerta (qiix dheerta), Cudurka Dabaysha iyo Teetanaha

PCV Pneumococcal conjugate

Rotavirus Talaalka Afka laga qaato ee Rotavirus

MenB Meningococcal B

MMR Jadeecada, Qaamo Qashiirka, Rubeelada

Busbuska (Varicella) Talaalka busbuska

MenC Meningococcal C



Maxaan filan karaa kadib marka cunugaygu qaato talaalladiisa?

- Qandho ayaa badanaa qabata kadib talaalka MenB. Fadlan u soo qaado sharoobada ilmaha dhashay ee barastamoolka labadaada booqasho ee ugu horeeya. Tan ayaa ka jebinaysa qandhada.
- Mararka qaar ilmaha ayaa yeelan kara nabar, barar ama gaduudashada meesha cirbada looga dhuftay. Xaqiiji inaan dharku aad ugu dhaganayn.
- Shubanka fudud waa wax caadi ah kadib marka la siiyo talaalka Afka laga qaato ee Rotavirus. Sii ilmahaaga caano badan. Si taxadar leh u farxalo kadib marka aad badesho ama aad qashinka ku rido xafaayada ilmahaaga.

Sabaalin iyo inaad naaska u dhigto ayaa caawinaysa ilmahaaga kadib marka la talaallo.

Xasusnoow in ilmahaagu u baahan yahay shan booqashooyin oo uu ugu tagaayo dhakhtarka guud (GP) si loo xaqiijiyo inuu talaal buuxa qaato.

Si aad u hesho xog dheeri ah
[Booqo immunisation.ie](http://Booqoimmunisation.ie)

